**War** saxaafadeed

# Horumarinta La Dagaallanka Cunsuriyadda

Febraayo 21, 2025 Media inquiries

## Dowladda Alberta waxay sii wadaa dadaalladeeda ka dhanka ah cunsuriyadda si loo dhiso bulsho isku dhafan.

Waaxda Socdaalka iyo Dhaqamada Kala Duwan ee Alberta waxay soo saartay warbixinteeda labaad ee sanadlaha ah, taasoo muujineysa tallaabooyin kala duwan oo dowladda qaaday sanadkii la soo dhaafay si loola dagaallamo cunsuriyadda, loo xuso kala duwanaanta, loona horumariyo fulinta talooyinka ku xusan Qorshaha Dagaalka Ka Dhanka Ah Cunsuriyadda ee Alberta.

Qorshahan oo la daahfuray 2022, wuxuu ka kooban yahay 28 talooyin oo la fulinayo saddex sano gudahood. Ilaa hadda, dhammaan 28-dii talo ee la qorsheeyay waa la guda galay, iyadoo 27 ka mid ah la dhameystiray.

"Warbixintani waxay muujineysaa tallaabooyinka dowladda ay qaaday si ay ula dagaallanto caqabadaha nidaamsan iyo takooridda. Waxaan aad ugu faraxsanahay horumarka la gaaray. Tallaabooyinkan ay dowladda qaaday waxay caawinayaan in Alberta noqoto gobol soo dhoweyn leh."

*Muhammad Yaseen, Wasiirka Socdaalka iyo Dhaqamada Kala Duwan*

Guulaha lagu xusay warbixinta waxaa ka mid ah Abuurista Guddiga La-tashiga ee Madowga Alberta, oo taageeraya shaqada Guddiga La-tashiga ee Alberta ee Ka Dagaallanka Cunsuriyadda iyo Golaha Premier-ka ee Dhaqamada Kala Duwan.

Barnaamijka Deeqaha Dhaqamada Kala Duwan oo bixiyay $5.1 milyan oo doolar sanadkii 2024 si kor loogu qaado wacyigelinta dhaqamada kala duwan. Barnaamijka Deeqaha Ka Dagaallanka Cunsuriyadda oo bixiyay $424,000 si loogu maalgeliyo 49 mashruuc oo ka hortagaya cunsuriyadda.

Classification: Public

"Guddigu aad ayuu ugu faraxsan yahay horumarka laga gaaray Qorshaha Dagaalka Ka Dhanka Ah Cunsuriyadda iyo sida dowladda ay uga go'an tahay la dagaallanka cunsuriyadda iyadoo adeegsaneysa waxbarashada dadweynaha, awoodsiinta bulshada, xog ururinta iyo wax ka beddelka nidaamka. Weli waxaa jira shaqo badan oo harsan."

*Sania Chaudhry, Guddoomiyaha Guddiga La-tashiga Alberta ee Ka Dagaallanka Cunsuriyadda*

La dagaallanka cunsuriyadda waxay u baahan tahay iskaashi guud oo ka yimaada dhammaan waaxyaha dowladda. Tan iyo markii la bilaabay Qorshaha, dhammaan waaxyaha dowladda waxay si firfircoon uga shaqeynayeen arrintan. Wasaaradda Adeegyada Bulshada iyo Arrimaha Odayaasha, waxay sanadkii la soo dhaafay qaaday tallaabooyin lagu taageerayo qowmiyadaha First Nations iyo Métis si ay u aqoonsadaan ugana gudbaan caqabadaha nidaamsan iyo bulsho, iyo in la horumariyo taageerada hoyga la awoodi karo.

"Waxaan ognahay in dadka asaliga ah ay wajahayaan cunsuriyad marka ay isku dayayaan inay helaan guryo la awoodi karo, isla markaana xulashooyinka jira aysan mar walba dabooli karin baahidooda. Sidaas darteed, waxaan sii wadeynaa inaan la shaqeyno dawladaha iyo ururada asaliga ah si loo hubiyo in guryaha la dhisayo ay la jaanqaadaan baahiyaha bulshada, islamarkaana ay bixiyaan taageero dhaqan ahaan habboon."

*Jason Nixon, Wasiirka Adeegyada Bulshada iyo Arrimaha Odayaasha*

Waaxda Xiriirka Hindida waxay ka go'an tahay inay yareyso kala duwanaanshaha iyadoo hirgelinaysa barnaamijyo iyo qorshayaal lagu taageerayo waxbarashada dadka asaliga ah, shaqo abuurka, hoyga degdegga ah, horumarinta daryeelka caafimaadka, iyo kor u qaadidda wacyiga dhaqanka.

"Dowladda Alberta waxaa ka go'an inay fuliso talooyinka Guddiga Runta iyo Dib-u heshiisiinta, iyada oo wax ka qabaneysa cunsuriyadda iyo takooridda nidaamsan ee ka jira gobolka. Waxaan sii wadeynaa inaan la shaqeyno hoggaamiyaasha asaliga ah si loo hubiyo in siyaasadaha iyo barnaamijyada ay ku jiraan aragtiyaha bulshada asaliga ah, loogana dhigo kuwo dhaqan ahaan habboon oo wax ku ool ah."

*Rick Wilson, Wasiirka Xiriirka Hindida*

Barnaamijka Kaabayaasha Amniga ee Alberta (ASIP) wuxuu taageeraa kooxaha diimeed iyo bulshooyinka halis ugu jira rabshadaha naceybka iyada oo la maalgelinayo qiimeynta amniga, hagaajinta kaabayaasha amniga, tababarka, qalabka amniga, iyo jawaabaha degdegga ah ee amniga. Si looga hortago

dhacdooyinka naceybka, dowladda waxay ballaarisay shuruudaha uqalanka barnaamijkan, si ay u noqdaan kuwo ka faa'iideysan kara dugsiyada diimeed ee Islaamka iyo Yuhuudda, iyo sidoo kale barnaamijyada laba luqadoodka ah ee Carabiga, ilaa dhammaadka sanadka 2025.

Sidoo kale, Cutubka Ladagaallanka Dambiyada Naceybka ee Alberta wuxuu sii wadaa wada shaqeynta uu la leeyahay hay'adaha ammaanka gobolka si loo yareeyo loona falanqeeyo dhacdooyinka naceybka iyadoo loo marayo tababarro, ururinta xogta sirdoonka, iyo taageerada baaritaanada.

"Maaha muhiim meesha aad ka timid Alberta, qof walba wuxuu u qalmaa inuu dareemo nabad iyo xushmad. Ficilada cabsi gelinta iyo burburinta ma lahan meel ay ka jiraan waddooyinka, dugsiyada, ama goobaha cibaadada. Dowladda Alberta waxay sameyn doontaa wax walba oo ay ku joojin karto dambiyadaas oo ay ku dhisi karto bulsho ammaan u ah qof walba."

*Mike Ellis, Wasiirka Amniga iyo Adeegyada Degdegga ah*

Dowladda Alberta si xooggan ayay u cambaareyneysaa dhammaan noocyada cunsuriyadda. Waxaa sii soconaya dadaallada waaxyaha dowladda ee wax ka qabashada takooridda iyo xoojinta bulsho isdhexgal leh.

Wasaaradda Waxbarashada waxay cusbooneysiisay manhajka si wax looga qabto cunsuriyadda, dhaqamada kala duwan, iyo isdhexgalka bulshada, iyadoo arrimahaas lagu daray maaddooyinka kala duwan sida barashada suugaanta, daraasaadka bulshada, iyo barnaamijyada jirdhisidda.

"Arday kasta wuxuu mudan yahay in uu iskuulka ku dareemo la aqoonsaday, la ixtiraamay, oo la soo dhoweeyay. Manhajkeena cusub wuxuu fursad u siinayaa ardayda inay bartaan kala duwanaanta Kanada iyo caalamka."

*Demetrios Nicolaides, Wasiirka Waxbarashada*

Dowladda Alberta waxay si adag u cambaaraynaysaa dhammaan noocyada cunsuriyadda. Shaqo ayaa ka socota wasaaradaha dowladda si loola tacaalo takoorka iyada oo la adeegsanayo tallaabooyin iyo hindisayaal badan oo lagu abuurayo gobol soo dhoweyn badan.

## Xaqiiqooyin degdeg ah

- Warbixinta Sanadlaha ah ee Ka Dagaallanka Cunsuriyadda ee Alberta waxay ka kooban tahay shan mowduuc:
  - Waxbarashada dadweynaha iyo wacyigelinta dhaqanka
  - Dawladdu inay hormuudka u noqoto hagaajinta nidaamyada

    - Awoodsiinta bulshooyinka
    - Wax ka qabashada dambiyada naceybka
    - Ururinta xogta iyo cabbiridda horumarka
- Warbixintii ugu horreysay ee sannadlaha ah ee Qorshaha Dagaalka Ka Dagaallanka Cunsuriyadda ee Alberta, oo la daabacay Diseembar 2023, waxay xustay 26 tallaabo oo laga qaaday 25 waaxood.
- Guddiga Latashiga Alberta ee Ka Dagaallanka Cunsuriyadda waxaa la aasaasay 2019 si uu talo uga bixiyo wax ka qabashada cunsuriyadda. 48 talo oo ay soo jeediyeen ayaa gundhig u noqday Qorshaha Alberta ee Ka Dagaallanka Cunsuriyadda.

## Macluumaad dheeraad ah

- Qaadashada Tallaabo Ka Dhanka Ah Cunsuriyadda: Horumarinta Dadaallada (Taking Action on Racism: Building Momentum)
- Barnaamijka Deeqaha Dhaqamada Kala Duwan (Ethnocultural Grant Program
- Barnaamijka Deeqaha Ka Dagaallanka Cunsuriyadda (Anti-Racism Grant Program)
- Barnaamijka Kaabayaasha Amniga Alberta (Anti-Racism Grant Program)
-

## Wararka la xiriira

- Khariidad cusub oo lagula dagaallamayo cunsuriyadda – Qorshaha Ka-hortagga Cunsuriyadda ee Alberta (Luulyo 18, 2022).( A new road map for combating racism)

## Su’aalaha Warbaahinta

Neil Singh
780-644-2212
Xoghayaha Saxaafadda, Socdaalka iyo Dhaqamada Kala Duwan